KARAAMA PRIMARY & SECONDARY SCHOOL

JUQRAAFI SU'AALO & JGAWAABO

(1) waa maxay noololey ama noolaha ?

(J) waa dhamaan nololeyda ama noolaha laga helo oogada sare ee dhulka waxaana ka mid ah (DHIRTA , XAYAWAANKA & AADANAHA)

(2) maxaa lagu tiriyaa nololeyda ?

(J) waxaa lagu tiriyaa inuu yahay mid ka dhalanayo falgalka ka dhexeeya gibillada dhulka sida (gibilka oogada dhulka, gibilka biyood & gibilka hawada)

(3) waa maxay astaamaha nololeyda ?

》 nololeyda waxay meteleysaa qeybta nool ee deegaanka

》 waxaa jira isdhaafsi kaarboon laba oksayd oo u dhexeeya nololeyda & gibilka

》 gibilka nololeyda waxaa lagu yaqaanaa kala duwanaanta waxa uuna ka kooban yahay ee noolaha & ma noolaha

(4) maxuu ka kooban yahay gibilka nololeyda ?

》 carrada

》 dhirta

》 xayawaanka

》 aadanaha

(5) waa maxay carrada?

(J) waxaa loola jeedaa Carro dhagaxa burburay kaa oo ay ku dhacday isbeddello kiimoko ah ayna ku milmeen waxyaabo orgaanik ah

(6) sheeg qeebaha carrada aay ka kooban tahay?

》 carro madoow

》 carro guduud

》 carro hurdiga

(7) waa maxay carro madoow ?

(J) waa noocyada carrada tan ugu wanaagsan beerashada waxaana laga helaa hareeraha wabiyada halkaa oo ah banaan Fataha

(8) waa maxay Carro guduud ?

Carradani xagga carrosannimada waxay ka hooseysaa tii hore waxaana keenayo midabkeeda jiritaanka burburka birta (iron oxides) waxayna ku filiqsan tahay gobalada kuleeylaha

(9) waa maxay Carrada hurdiga ?

(J) waxay ku haboon tahay kaliya in lagu beerto dalagyada qaarkood waxaana laga helaa meelaha lama dagaanka ah

(10) Ahmiyada ay carradu u leedahay noolaha?

(J) carradu si guud waxay waxtar weyn u leedahay dhamaan noolaha sida aadanaha, dhirta

(11)Qaybaha ahmiyada carradu u ledahay noolaha ?

》 xididdada dhirtu waxaa dhulka ku hayo waa carada taa oo keeneysaa in dhirtu u kobacdo si dabiici ah

》 carradu waxay dhirta & cowska dhulka lagu beero siineysaa biyaha & macaadinta milixda (cusbo) taa oo ka dhigan quudka shirts

》 waxay ka ka shaqeynesaa ciidu iney cunnada soo gudbiso, sidoo kale waxay ka tahay hoy ay leeyihiin xayawaannada

》 waxay burburineysaa wax yaabaha organigga ah iyadoo loo marayo waxyaabaha il ma aragtida ah

》 Ugu dambeyntii si ay ciidu u gudato howlaheeda kala duwan una soo gudbiso waxtarkeeda ay u leedahay habdhis deegaanka dhameystiran

(12) maxay ka kooban tahay carradu ?

Waxay ka kooban tahay

》 walxo macdaneed

》 huyuumas

》 biyo

》 hawo

(13) Qeex haraadiga nafleyda ?

(J) haraadiga nafleyda waxaynahhj ka dhigan tahay wax yaabaha haraadiga ah ee ka soo jeeda dhirta

(14) Qeex sameysanka carrada ?

(J) waxaa jira waxyaabo badan oo kala duwan oo ka qeyb qaato sameysanka carrada waxaana ka mid ah carroguurka

(15) waa maxay Carroguurka ?

(J) carro guurka waxaa inta badan dhaliyo ama keena dadka, xoolaha, biyaha & dabeeysha

(16) waa maxay dhagax burbur ?

(J) biya socda ama daadadka, wax yaabaha kiimikada ah ama wax yaabaha macaadinta ah ee ka dhalanayo dhirta

(16) waa maxay tuulimaad ?

(J) qulqulka hawada awgeed waxaa la soo qaadayaa burburka carrada iyadoo laga qaadayo meel lana geenayo geeynayo meel kale

(17) waa maxay dhirta dabiiciga ah ?

(J) dhirta dabiiciga ah waxaa lagu tiriyaa in ay tahay qodob muhiim u ah jiritaanka xayawaanka & aadanaha

(18) sheeg qaybaha dhirta dabiiciga ah ?

》 kaymaha

》harame

》caws

(19) qeex kaymaha ?

(J) kaymaha waa qeebta ugu Wayn uguna muhiimsan qaybaha dhirta

(20) sheeg qaybaha kaymaha ?

》kaymaha kulaaleyda

》 kaymo xiliyeed

(21) meeqaa loo qaybiyaa kaymaha cimilada dhax dhaxaad ka & kaymaha qaboobaha ?

》 kaymaha caleen dhacsadayaasha

》 kaymaha caleen cir badleeyda

(22) waa maxay kaymaha kulaaleyda ?

(J) dhirtana waxay ka muuqaneesaa banaanada kulaaleyda ah

(23) waa maxay kaymo xiliyeed ?

(J) kaymo xiliyeedku waxay ku jiraan kaalinta labaad kadib kaymaha kulaaleyda dhanka filiqsanaanta

(24) waa maxay harame ?

(J) haramuhu sidaa caadiga ah waxa uu ka baxaa meelaha uu ku da'o xaddi roobeed yàr oo aan ogalaneen in ay ku baxdo gaydo waa wayn

(25) sheeg qaybaha haramaha marka loo eego ku xirnaanta xaddiga roobka ?

(J) waxayna kala yihiin >

《☆》 safaanaha

《☆》 istibsi

(26) waa maxay safaanaha ?

(J) safaanaha waa caws dhaadheer oo adag

(27) waa maxay istibsi ?

(J) waa harame gagaaban oo jilicsan

(28) waa maxay caws ?

(J) caws ku waa dhir gagaaban kala jaad ah taa oo ka baxdo meelo kala duwan oo dunida ka mid ah

(29) sheeg wax yaabaha sameeya dhirta dabiiciga ah ?

(J)Dhirta dabiiciga ah way kala duwan tahay xagga tilmaamaha, filiqsanaanta iyo cufnaanta waxaana jira wax yaabo sabab u ah arimahaan waxaana ka mid ah

》 carrada

》kalasareynta dhulka

》heerkulka iyo iftiinka

》 xaddiga da'aaga roobka

(30) waxka sheeg ahmiyada iyo waxtarka dhirta dabiiciga ah ?

》 waxay ilaalisaa qoyaanka carrada

》waxay yareesaa xaalufka ama in uu dhulku lama dagaan isu badalo

》dalalka qaar waxay u adeeg sadaan il tamar ama shidaal

》 qaarbadan oo ka mid ah noocyada dhirta dabiiciga ah ayaa sidoo kale loo isticmalaa in laga helo cuno dabiici ah ee xayawaanka sida daaqa

》waxaa sii dheer in loo isticmaalo sida jardinooyinka & keedka dabiiciga ah

(31) Sanadkee ayee soo baxday warbixinta tilmamayasha hormarka ?

(J)waxay soo baxday sanadku marka uu ahaa 2016 CD

(32) sheeg mudadii rubac qarniga aheed tirada dhirta ay dunida lumisay ?

(J) tirada dhirta ay dunidu lumisay ku dhawaad 1,2200km², badka kaymaha laga soo bilaabo 199O CD

(33) Sheeg tirada dhirta ah ay lumisay ameerikada koofureed ?

(J) waxay lumisay ku dhawaad 970km² oo badka kaymaheda ah

(34) sheeg qataraha ama dhibatooyinka haysta dhirta dabiiciga ah ?

》 isticmaal xumada aadanaha ee laxariirta dhirta dabiiciga ah

》 gubashada kaymaha

》 isbadal ka xun ee ku dhacay deegaanka dhirta

(35) waa maxay aadanaha ?

(J) aadanaha waxaa lagu tiriyaa qaybo muhiim ah oo katirsan nololeyda

(36) sheeg sameeynta ugu ween ee aadanaha deegaanka ku yeesho ?

(J) aadanaha sameeynta ugu ween ee uu deegaanka ku yaasho waxaa ka mid ah hagaajinta dhul bereedka, dhismooyinka daaraha, wada jeexinta, macdan qodashada iyo dhamaan hoolaha kale ee kala duwan ee aadanahu qabto .

(37) sheeg qaybaha xayawaanada ?

》 shimbiraha

》 daaqqe (qeybaheeda duurjoogta & dabjoogta)

》 xayawaanada ugaarsada

》 cayayaanka

》 il ma'aragtada

(38) sheeg wax yaabaha sameeya filiqsanaanta xayawaanada ee dhulka oogadiisa ah ?

》 dhirta dabiiciga ah

》 cimilada

》 kala sareeynta dhulka

(39) meeqo ayuu gaarayaa jooga ay xayawaanada ku noolaan karaan ?

(J) waxa uu gaarayaa 3000meter oo kun marka loo eego jooga badda

(40) waa maxay gobal dabiici ah ?

(J) gobal dabiici ah waxaa loo la jedaa goob dhulka kamid ah oo leh astaamo isku mid ah marka laga eego xagga cimilada & dhirta kana duwan gobalada kale

(41) sheeg gobalada dabiiciga ah ee dunida ugu muhiimsan ?

》 gobalada kulaaleyda ah

》 gobalada diirimaad dhax dhaxaadka ah

》 gobalada qaboobaha dhax dhaxaadka ah

》 gobalada qaboobaha cirifyada

》 gobalada buuraleyda

(42) waxaad sheegtaa fidsanaanta gobalada kulul ?

(J) gobal kani waxa uu u fidsan yahay labo dhanac dhul baraha ee meelaha hoseeya inta u dhaxaysa loolal ka 5° waqooyi & koofur, waxa uu u balaaran yahay dhanka bari qaaradaha.

(43) sheeg tilmaamaha cimilada ee gobalkaan ?

》 gobalka badhaalaha

》gobalada kulaaleyda ah

》 gobalka maan suunta

》 gobalka lama dagaanka

(44) sheeg tilmaamaha & astaamaha gobalka badhaalaha ?

》 heer kulka oo sareeya sanadkoo dhan

》faraqa heer kulka maalintii oo aad u wayn

》 faraqa heer kul sanadeedka oo yar ,kaa oo aan ka badneen 5 digree wuuna ka sii yaraanayaa badaha kor kooda.

》 roobka oo badan, wuxuuna ka sareeyaa 1,500mm waana celceliska sanadlaha, wuuna cirka da'ayaa sanadka oo dhan roobka waxa uu kordhayaa xiliga guga & dayrta

(45) sheeg xayawaanada ugu muhiimsan ee hooyga u yahay gobalka badhaalaha ?

(J) xayawaanadaas waxaa ka mid ah daanyeerta, xamaaratada, gariga, sidoo kale dusha sare ee kaymaha waxaa ku nool noocyo badan oo balaley ah (shimbiro midab kala duwan leh) & yaxaas wabiyada ku dhax nool

(46) sheeg ahmiyada dhaqaale ee gobalka badhaalaha ?

(J) geedaha kuyaal gobalkaan waxaa laga soo saraa alwaax, waxaa lagu beertaa cinjirka, koo kaha & qumbaha

(47) sheeg fidsanaanata gobalada kulaaleyda ah ?

(J) gobalada kulaaleyda ah waxa ay fidsan yihiin goloob badhka waqooyi & kan koofureed inta u dhaxaysa 5 digree

-23.5 digree waqooyi & koofur

(48) sheeg nolasha xayawaanka gobalka badhaalaha ?

(J) gobalada kulaaleyda ah waxa lagu tiriyaa inay tahay gobalada dabiiciga ah kuwa ugu hodansan xaga nolasha xayawaanada waxaana loo qeebiyaa xayawaanadiisa labo qaybood oo waa weyn

》 xayawaanada daaq cunaha ah (daaqqe)

》 xayawaanada ugaarsada ama hilibka cuna

(49) waa maxay gobalka mansuunta ?

(J) gobalkani waxaa laga arki karaa meelaha oo roobka ka da'o halxili wana xiliga xagaaga sababtoo ah xiligaan waxaa soo dhalaneysa dabeeysha mansuunta

(50) sheeg tilmaamaha gobalka mansuunta ?

(J) waxaa astaan u ah gobalkaan heer kul sarre sanadka oo dhan ah

(51) waa maxay gobalka lama degaanka ah ?

(J) lama dagaanka waa meelaha ay biyuhu ku yar yihiin ama dhif yihiin

(52) waa maxay celceliska dhulka lama dagaanka ah ?

(J) celceliska roobka sanadlaha ah wuxuu ka yar yahay 350mm

(53) sheeg loolalka dhulka gobalka lama dagaanka ah ?

(J) gobalkni wuxuu u dhexeeyaa loolalka 18-30 digree waqooyiga badhaalaha ee galbeedka qaaradaha.

(54) sheeg ahmiyada dhaqaale ee gobalka lama dagaanka ah ?

(J) heerkul sare xiliga xagaaga,qoboow daran xiliga jilaalka & roob dhif ah ama aad u yar

(55) sheeg nolasha xayawaanada gobalka lama dagaanka ah ?

(J) waxaa ku nool halkani deerada, dawacada, yeeyda , masks & abbeesada luga leeyda.

(56) sheeg ahmiyada dhaqaale ee gobalka lama dagaanka ah ?

(J) waxaa ka jira gobalkaan mehrado xoolo dhaqashada, sidaa oo kale dhirta lama dagaanka qaarkoodna waxaa loo isticmalaa daawo ahaan.

(57) sheeg waa maxay gobalka badda dhexe ?

(J) gobalkani wuxuu u dhexeeyaa loolalka 40- 30 digree waqooyi & koofur dhul baraha ee galbeedka qaaradaha dhexdooda.

(58) sheeg tilmaamaha cimilada gobalka dhax dhaxaadka ah ee diiran ?

(J) kuleyl, qalleyl xilliga xagaaga, diirrimaad oo roob leh xiliga jilaalka.

(59) sheeg gobalka goodiga bari (jaadka shiinaha) ?

(J) gobalkani wuxuu u dhexeeyaa loolalka 30° - 40° waqooyi iyo koofur dhul baraha ee bariga qaaradaha.

(60) sheeg tilmaamaha gobalka goodiga bari ?

(J) kuleyl xiliga xagaaga, diirimaad xiliga jilaalka iyo roob da'ayo sanadkoo dhan.

(61) sheeg gobalka dhax dhaxaadka qaboow ?

(J) wuxuu u dhexeeyaa loolalka 40°-60° waqooyi & koofur dhul baraha xeebaha galbeedka qaaradaha.

(62) sheeg nolasha xayawaanada gobalka dhex dhaxaadka ah ?

(J) waxaa laga helaa xayawaanada rinnada, dawacada, ... I W M .

(63) sheeg gobalka qaaradeed ?

(J) waxa uu u dhexeeyaa gobalkaan 30°-60° bartamaha qaaradaha ?

(64) sheeg tilmaamaha cimilada gobal qaaradeed ka ?

(J) Gobalka qaaradaha, xagaaga dhexdhaxaad ah, jilaal qaboow.

(65) sheeg ahmiyada dhaqaale gobol qaaradeedka ?

(J) waxaa laga fa'iideystaa kaymaha toobineedka kuwaa oo lagu tilmaamo alwaaxda ugu wanaagsan

(66) sheeg gobalka looraanshiyaanka ?

(J) wuxuu u dhexeeyaa gobolkaan 40°-60° waqooyi & koofur dhul baraha ee bariga qaaradaha.

(67) sheeg tilmaamaha gobalka looraanshiyaanka ?

(J) xagaa dhexdhaxaad ah jiilaal qabow ah, roobabkiisuna waa dhexdhaxaad sanadkoo dhan, xagaa mahiigaan ah.

(68) sheeg nolasha xayawaanada gobalka looraanshiyaanka ?

(J) waxaa ka mid ah xayawaanadiisa, Dabagaalaha, dawaco....iwm

(69) sheeg ahmiyada dhaqaale ee gobalka looraanshiyaanka ?

(J) waxaa laga fa'iideystaa kaymahiisa caleen dhacsadeyaalka ah .

(70) sheeg gobalada qaboobaha ah ?

(J) gobalka cirifka, wuxuu u dhexeeyaa loolalka 60°-90° waqooyi iyo koofurta dhulbadhaha

(71) sheeg tilmaamaha gobalka qaboobaha ?

(J) xagaa qaboow ah oo aad ugaaban, jiilaal qabow oo aad u dheer, roobab qaab baraf ahaana u da'a.

(72) sheeg ahmiyada dhaqaale ee gobalka qaboobaha ?

(J) halkani waxaa ka jira mehradda ugaar siga xayawaanada dhogorta leg & dhaqashada xayawaanka rinnada.

(73) sheeg nolasha dhirta dabiiciga ah Somalia ?

(J) dhamaan muuqaallada kala duwan ee dhulka waxaa ku dahaaran ama ku daboolan, dhir siinaysa muuqaal qurxoon .

(74) sheeg cufnaanta dhirta dabiiciga ah gobalada koofureed waxyabaha horseedayo ?

》saamiga heerka huurka oo aad u sarreeya (humidity).

》 roobabaka oo badan

》dhulka oo carro san ah dhumuceeda ay aad sarreeyso

(75) sheeg isticmaal xumida ee ku hayaan xoolo dhaqatada, beerraleyda, ganacsatada, jarida & gubidada geedaha ee joogtada ah ?

》isticmaalka maxaliga ah ee kala duwan sida dhuxusha & dhismaha

》in lasoo saaro dhuxusha dhirta laga sameeyo si loogu gaddis geeyo suuqyada dibadda

》 daaqsiga xad dhaafka ah

》isbadalka cimilada

》duulaannada isdabajooga ah ee ayaxa waxay keentay in ay baaba'do tiro aad ubadan oo dhirta dabiiciga ah.

(76♡sheeg waxtarka dhirta dabiiciga ah ee Soomaaliya ?

|1|♡ dhirta waxaa loo tixgeliyaa inay ka mid tahay ilaha ugu muhiimsan ee lacafka Soomaaliya, maaddaama ay meteleyso 98% wadarta ilhaha calafka ee dalka.

|2|♡ kala duwanaanta dhirta ee xagga nooca iyo cufnaanta waxay saameyn ku leedahay hannaanka filiqsanaanta & noocyada xayawaanada ee dhulka Soomaaliya dhexdiisa.

|3|♡ dhirtu waxay carrada ka ilaalisaa carro guurka & xafrfashada

(77) sheeg badka dhulka daaqsinka Soomaaliya ?

(J) dhulka daaqsinka Soomaaliya wuxuu garayaa ku dhawaad ☆28.65☆ MELYAN HEKTAR

(78) sheeg inta uu balaaranayo dhulka daaqsinka ah sanadaha roobka ?

(J) waxa uu balaranayaa ☆ 36 ☆ MELYAN HEKTAR sidaa awgeed waxay daboolan tahay qeybo ballaaran oo ka mid ah dhulka Soomaaliya taa oo gareesa 57% badka guud ee dalka.

(79) sheeg qiyasaadka duunyo ee lasameeyey ?

(J) waxaa waaye☆{ 36.64}☆MILYAN OO NEEF.

(80) sheeg ahmiyada xagga cunada ee Soomaaliya ?

(J) guud ahaan dadka Soomaaliyeed waxay si weyn ugu tiirsan yihiin cunooyinka ka soo jeeda wax soo saarka xoolaha sida hilibka & Canada {cad iyo caano} ,

(81) sheeg qaybaha ahmiyada dhaqaale ee Somaliya ?

♡ kaalintooda xagga dibbadaa

♡ xoogsiga (shaqada)

♡ saami ahaan waxay ka tahay wax soo saarka maxaliga ah ee dalka 50% ama waxa loo yaqaan wax soo saarka guud ee qaranka {GDP}

♡ Waxaa sarreeya waxa ku soo aadayo qofkiiba oo xoolo ah marka loo qeybiyo dadka Soomaaliya taa oo aad ugu sarreysa dalalka kale.

Prepared : 《Abdi wahid Mohamed Abdullahi 》 -=(geela gaabow)